

# Tallaalidda Teetanada iyo Gawracatada

Waxa aad u  
baahantahay  
intaadan adiga ama  
ilmahaagu helin  
tallaalka



**CDC**  
CENTERS FOR DISEASE  
CONTROL AND PREVENTION  
U.S. DEPARTMENT OF HEALTH & HUMAN SERVICES  
Public Health Service  
Centers for Disease Control and Prevention

## WAX CUDURADAN KU SAABSAN

Teetanada iyo gawracatu waa cudurro khatar ah. Teetanada waxaa keena jeermis gala jirka marka wax gooyaan ama dhaawac gaaro.

Gawracatadu waxay faaftaa marka jeermisku ka soo gudbo qof sadhaysan una gudbo sanko ama cunaha kuwo kale.

### Teetanadu waxay sababtaa:

Qabandhaco daran oo xanuun badan oo muruqyada ah.

### Taasi waxay ku sii keeni kartaa:

- daanku inuu xirmo oo marakaa qofka bukaa uu furi kari waayo afkiisa ama uu wax liqi kari waayo.

### Gawracatadu waxay sababtaa ;

Lakab adag oo ku samaysma sanko gudhiisa , cunaha , ama jidka hawadu martu.

### Taasi waxay ku sii keeni kartaa:

- dhibaato ka timaada xagga neefsashada  
- garaaca wadnaha oo hoos u dhaca  
- faalig  
- dhimasho

## WAX KU SAABSAN TALLAALADA

### Faa'iidooyinka tallaalada

Tallaalidu waa habka ugu wanaagsan ee lagaga hortegi karo teetanada iyo gawracatada. Tallaalidda darteed, waxaa jira xaalado yar ama jiritaanno yar oo cuduradan ah. Xaaladaha jiritaanka cuduradani aad bay ugu yaryihiin carruurta maxaa wacay inta badan waxay helaan tallaalada DTP, DTaP, ama DT. Waxaa jiri kara xaalado badan oo jiritaanka cuduradan ah haddii aynu joojinno tallaalidda dadka.

### Goorma ayaad heli kartaa tallaalka Td (teetanada iyo gawracatada)?

Td waxaa lagu sameeyaa dadka jira 7 sano iyo wixii ka wayn.

Dadka aan helin 3 qaadasho (dose) oo ah mid uun oo ah tallaalka teetanada iyo gawracatada (DTP, DtaP, ama DT) intay noolyihiin ayaa ah inay qaataan Td. Marka qofku helo doosaha 3aad, doose Td ah ayaa loo baahanyahay 10-kii kasta ee sano intuu qofku nool yahay oo dhan.

Waxaa laga yaabaa in lala qaato tallaalo kale isla mar Td-da.

Usheeg dhakhtarkaaga ama kalkaaliye dhakhtarkaaga haddii qofka/ta tallaalka qaadanayaa/saa:

- uu weligii yeeshay ama noqday mid jirkiisu aad udiido ama ku xajimoodo ama uu kala kulmo dhibaatooyin marka uu qaadanayo Td, ama tallaalada kale ee teetanada ama gawracatada (DTP, DTaP, ama DT)
- uu hadda xanuunkiisu yahay mid dhex-dhexaad ah ama aad ah
- ay uur leedahay

Haddii aanad hubin, waydii dhakhtarkaaga ama kalkaaliye dhakhtarkaaga.

### Maxay yihiin dhibaatooyinka ka yimaada qaadashada tallaalka Td?

Sida dawo kasta oo kale, waxaa jira dhibaatooyin yar-yar taasoo ay dhibaatooyin waaweyn, oo xataa dhimasho ahi dhici karaan, marka tallaalka la qaato.

Dhibaatooyinka ka yimaada tallaalka aad bay uga yaryihiin dhibaatooyinka ka yimaada cudurka hadday dadku joojiyaan isticmaalka tallaalka.

Inta badan daka qaata Td wax dhibaato ah kalama kulmaan qaadashadeeda.

## Dhibaatooyinka aan aadka u darnayn

Haddii dhibaatiyinkaasi dhacaan, sida caadiga ah waxay bilawdaan saacado gudahood laga soo bilaabo maalin ama laba maalmood kaddib tallaallidda. Waxaa laga yaabaa inay ku dhamaadaan 1 ilaa 2 maalmood:

- damqasho, casaan, ama baradh ah meesha irbadda lagaa siiyey.

Dhibaatooyinkaasi way ku sii xumaan karaan dadka waaweyn ee qaata tallaalka Td marar badan.

Acetaminophen ama ibuprofen (aan aspirin ahayn) ayaa la isticmaali karaa si xannuunka looyareeyo.

## Dhibaatooyinka aadka u daran

Dhibaatooyinkaasi waxay dhacaan **marar dhif ah**:

- muujin fal celis ah diidid jirku diido dawada ama ku xajiimoobid aad udaran.
- aad udaran, xanuun joogto ah leh, iyo lumin muruqa cududda (-ha) sare. Tani waxay bilaabataa 2 casho ilaa 4 usbuuc kaddib irbad qaadashada, waxaana laga yaabaa inay ku dhammaato bilo badan.

## Waxa ay tahay in lasameeyo haddii uu jiro fal celis(dawada oo jirkaagu diido ama ku xajiimoodo):

Wac dhakhtar ama isla markaba waa inaad heshid qofka kuu geeynaya dhakhtar.

Qor waxa dhacay iyo taariikhda iyo waqtiga ay dhacday.

Waydiiso dhakhtarkaaga, kalkaaliye dhakhtarka, ama hay'adda caafimaadka inay kuu xereeyaan fayl ah foom Warbixin Dhacdo Dhibaataada Tallaalka ama wac :

(800) 822-7967 (dirsasho bilaash ah)

---

**Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka ee Qaranku** wuxuu siiyaa magdhaw (shafshafo) dadka loo malaynayo in tallaalku dhaawacay. Si aad u heshid faahfaahin wac:

(800) 338-2382 (dirsasho bilaash ah)

---

Haddii aad doonaysid inaad wax ka baratid wax badan, waydii dhakhtarkaaga ama kalkaaliye caafimaadkaaga. Waxay/wuxuu ku siin karaa buqshad ay tallaalku ku guda jiraan ama waxay gooyn doonaan (go'aamin doonaan) meelo kale oo aad war ka heshid.

